

EMPH – DADKA AJAANIBTA EE KULEEJOOYINKA

Koleejooyinka wa dugsiyo kala duwan oo la seexdo waxna laga cuno. Habka dugsiyadaan waa waxbarasho balaaran laguna dhigto maadooyin kala duwan , oo waxyaala badan aad ka faa'iidi kartaan. Waa meel la ogol yahay inaan sameysid waxaa aad naftaada u jecashahay inay sameeyso. Waana meel aad ku horumarin kartid kartidaada iyo waxii aad xiisaynaysidba, ahna meel dabecad caafimaad leh. Waxbarashada mar walba waxaa loo sameeyaa hadba baahida ay ardada qabaan. Waana muhiim in uu ardada iyo macalimiinta ay wada hadal ka dhaxeeyo sidaas oo kale ay ardada wadahal dhexmaro.

Marka la aadayo koleejooyinkaan, waxaa meel ay ardada oo dhan ay isla deggan yihiin dugsiya dhexdiisa. haddii aad doonaysid inaad is horumarisid, baratid waxyaabo cusub, ku fiicnaatid maado qaas ah, waxaa ay kugu suurtoobi karaan waa koleejo. Koleejooyinka waa ay xushmeeyaan dadka kala duwan, waxaa loo haystaa in qofka aan wadan u dhalan laga faa'iidaysan karo. Koleejooyinka waxay aad u xiisayaan dhaqamada kala duwan sida raashinka iyo waxyaalo badan oo dadku ku kala duwan yihiin.

Horo u socod

Dhalin badan waxay doortaan koleejooyinka ,si ay isugu diyaariyaan inay cilmi hore u sii wataan ama ay xooga saaraan dhanka shaqada. Qaarar badan waxay koleejooyinka u doortaan inay waxyaabo badan oo nolol maalmeedka la xiriira ay kororsadaan, halkaasoo aad naftaada ku horumarin kartid. Koleejooyinka waxaa ay kuu soo bandhigayaan maadooyin badan laga bilaabo Compiyuutarka, isboortiga ilaa maadada cilmi nafsiga. Waxbarashada waxay kuu suurtagelinaysaa inaad maadooyin badan kana qeyb qaadatid firfircooni badan. Waxbarashada waxaa ku baraya dad aqoon u leh , kuuna baraya si wanaagsan oo raaxo leh.

Koorasyada koleejooyinka waxa ay qaataan moddooyin kala duwan. Waxaad qaadan kartaa laga bilaabo sitimaan ama 8 bilood mid ah. Qaasatan koorasyada waqtiyada dheer qaata waxaad kaa faa'iidaysaa saaxiibo badan iyo maadooyinkii oo aad si fiican u baratay. Koleejooyinka waa meelo waxbarasha ku fiican.

Koleejada – waxaaad ka helaysaa faa'iido iyo qibrad

Waxaa markii ugu horeysay koleejo deenish ah laga bilaabay magaalada Rødding sannadkii 1884. maanta waxaad ka helaysaa 84 koleejo oo wadanka oo dhan ku baahsan. Koleejooyinka waxaa ay kuu soo bandhigayaan maadooyin iyo faa'iidooyin

badan. Dad badan waxay u doortaan kuleejada inay isu diyaariyaan cilmi ama isu diyaariyaan sidaay ugu suurtoobi lahayd suuqada shaqada.

Dadkii yimid sida qaxooyiga iyo soo galootiga/ajaanibta ilaa hadda xil weyn ama si weyn uma fahamsana, waxaa ay taasi ku dhacday aqoon darada ay u leeyihiin kuleejooyinka. Dhalinta ajaanibta ama qaxootiga ee soo maray dugsiyadaan waa ay amaaneen oo joogista ay meelahaas soo joogeen wax fiican ayey ka sheegeen, badankood waxa ay isku raaceen inay qof ay kor u qaadayso, maadaama uu wadanka ku cusub yahay dhan walba marka laga fiiriyo. Waxaayna sheegeen in dugsiyadaas la deggo ay sameeyso xiriir fiican dadka meesha aad isku barateen. Taasoo waxyaabo badan ka caawin karto. Baaritaankii ugu dambeeyey ee la sameeyey waxaa ay na tusaysaa sidoo kale, oo waliba dadka shaqada bixiyaa ay hadda kuleejooyinka U xisaabiyaan meel wanagsan qof soo maray oo qibrad ka soo qaatay, waana wax lagu xisaabinayo inaad soo martay kuleejo.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah ama qoraalo waxaad nagala soo xiriiri kartaa ciwaanka hoos ku qoran:

Ururka Kuleejooyinka ee Danmark
Nytorv 7
1450 København K

tlf.: 33 36 40 40
haadii kale eeg bogga WWW.minoriteter.hojskolerne.dk
Hogaamiyaha qorshaha: Khuram Shehzad

Email: ks@ffd.dk